


# Haddii ay digniin ka timaado warshadda tamarta nukliyeerka ee Ringhals

- waxan ayaad u baahan tahay  
inaad ogato



# Hordhac

---

<b>Ku socota qofka deggan agagaarka Warshadda tamarta nukliyeerka ee Ringhals .....</b>	<b>3</b>
Aagagga diyaargarowga ee ku xeeran Warshadda tamarta nukliyeerka ee Ringhals .....	4
<b>Sidan ayaa laguugu digi doonaa .....</b>	<b>5</b>
Digniin gudaha guryaha .....	5
Digniin dibedda guryaha .....	6
Tijaabinta nidaamka digniinta .....	6
<b>Sidan ayay kuu saameynayaan maaddooyinka kaahfalaha ah iyo shucaacu .....</b>	<b>7</b>
Sidee ayuu shucaacu dhaawac kuugu keenaa? .....	7
Shucaaca shil warshadda tamarta nukliyeerka .....	8
Tusaale dooska shucaaca ka mid ah .....	9
<b>Sidan ayaad isku ilaolineysaa .....</b>	<b>10</b>
Guriga gudihiisa joog .....	12
Qaado kiniinka Aayodhiinka kaliya marka maamulka gobalku kugu booriyo uun .....	12
Meel kale u daadgureyn .....	14
Cuntooyinka qaarkood iska jooji .....	17
<b>Sidan ayaynu isku diyaarinnaa .....</b>	<b>18</b>
Waxan ayay hay'adaha dawladdu qabanayaan .....	18
Waxay warshadda tamarta nukliyeerka leedadahay diyaargarow .....	19
Diyaargarowgaaga guriga .....	19
Isku diyaargaree inaad guriga gudahiisa joogtid .....	19
<b>Halkan ayaad macluumaad dheeraad ah ka helaysaa .....</b>	<b>21</b>
Macluumaad ku saabsan masiibooyinka .....	21
<b>Liiska waxyabaha la hubinayo .....</b>	<b>22</b>

Waxa macluumaadkan soo saaray Hallands län isagoo kaashanaya Strålsäkerhets-myndigheten (hay' adda badbaadada shucaaca) iyo Myndigheten för samhällsskydd och beredskap (hay'adda badbaadada iyo gurmadka shacabka).

Daabacaada: DanagårdLiTHO, febraayo 2022. Soo saarista: Advant.

# Ku socota qofka deggan agagaarka Warshadda tamarta nukliyeerka ee Ringhals

---

Qofka ag deggan warshad tamarta nukliyeerku waa inuu si fiican ugu diyaargaroobaa haddii shil tamarta nukliyeer ahi dhaco. Shilka tamarta nukliyeerku waxa uu keeni karaa inay soo baxaan walxo shu-caac ah oo dadka iyo deegaankaba waxyeello u geysan kara.

Waa masuuliyada Länsstyrelsen (Maamulka gobolka) inay dadweynaha ilaaliyan haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco. Waxay sidoo kale masuuliyad kaa saarantahay inaad fahanto tilmaamaha la raacayo. Waxa buug-yarahan laguu siinaya maaddaama oo aad degantahay ama aad dhex joogtid aagga diyaargarowga. Waxa aagagga diyaargarowga laga helayaa diyaargarow loogu talagalay si dadweynaha loogu ilaaliyo.

Aqoontaada ku saabsan waxa la samaynaayo haddii uu shil dhaco ayaa sidaas darteed qeyb ka ah diyaargarowga. Sidaa darteed, si taxadar leh ugu akhri waxa buug-yarahan ku qoran. Markaas ayaad tahay qof u diyaar gareysan qaabka laguugu digayo, qaabka laguu wargeli-naayo haddii uu shil dhaco iyo waxa lagaa filanayo inaad sameyso.



Meel ku keydso buug-yaraha si aad si dhibyar ula soo bixi kartid waana inaad sidoo kale ogsoonaataa halka aad maclumaad dheeraad ah ka heli kartid. Buug-yaraha iyo maclumaadka la midka ah ayaa laga dalban karaa ama laga akhrisan karaa [www.lansstyrelsen.se/halland](http://www.lansstyrelsen.se/halland).

## Aagagga diyaargarowga ee ku xeeran warshadda tamarta nukliyeerka ee Ringhals

Aagagga diyaargarowga ee ku xeeran warshadda tamarta nukliyeerka ayaa lagu xadeeyey waddooyinka iyo xuduudaha kale ee dabiiciga ah. Masaafada dhabta ah ee warshadda tamarta nukliyeerka ah ayaa sidaas darteed ama ka yara gaaban karta ama ka dheeraan karta meelaha qaarkood.



- Aagga diyaargarowga ee gudaha qiyaastii 5 km
- Aagga diyaargarowga ee dibadda qiyaastii 25 km

# Sidan ayaa laguugu digi doonaa


Haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco waxa laguu digi doonaa iyadoo la soo maraayo Nidaamka digniinta iyo wargelinta ee loo yaqaano VMA (Ogeysiis muhiim ah oo dadweynaha ku socda). Haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco waxa laguu digi doonaa iyadoo la soo maraayo Nidaamka digniinta iyo wargelinta ee loo yaqaano VMA (Ogeysiis muhiim ah oo dadweynaha ku socda). Waxa farriinta VMA sidoo kale SMS ahaan loogu diri karaa telefoonada gacanta ee goob gaar ah jooga.

## Digniin gudaha guryaha

Dhamaan dadka ku nool aagagga diyaargarowga ee ku wareegsan warshadda tamarta nukliyeerka waa inay lahaadaan aalada digniinta soo qabata taas oo sidoo kale u shaqeyn doonta sida raadiyowga. Aaladda ayaa si toos ah u shidmeya markay digniin ka timaaddo warshadda tamarta nukliyeerka. Wuxaa aalada digniin qaabileha ka dhagaysan doontaa kanaalka diyaargarowga ee Raadiyowga Iswiidhan ee P4 Halland. Markaad dhageysato Raadiyowga Iswiidhan ee P4 Halland ayaaad heli doontaa maclumaaad ku saabsan waxa ka dhacay warshadda tamarta nukliyeerka iyo waxaad sameynayso si aad naftaada iyo dadka kale ugu illaaliso.

Qoysaska iyo meheradaha ku yaala aagagga diyaargarowga ayaa heli doona aalada digniin-qaabile oo ay bixiso hay'adda Myndighetean för samhällsskydd och beredskap (MSB). Aalada digniin qaabileha dhig guriga gudahiisa meel dhex ah.

Dhammaan qoysaska iyo meheradaha ku yaala aagagga diyaargarowgu waa inay lahaadaan aalad digniinta soo qabata oo iyaga u gaar ah taas oo toos u shidmata haddii ay digniin dhaco.




## Digniin dibedda guryaha

Aagagga diyaargarowga waxa yaalla fursad qofka dibedda jooga loogu digayo. Dhawaaqa ka soo baxa digniinta dibedda ee "Hesa Fredrik" waxay ka dhigan tahay inaad gudaha gasho, albaabbada, daaqadaha iyo meelaha hawada ka soo gasho aad wada xidho oo aad dhegaysato Raadiyowga Iswiidhan (Sveriges Radio) ee P4 Halland. Guriga gudahiisa joog ilaa intaad tilmaamo kale ka helayso Raadiyowga Iswiidhan ee P4 Halland.

## Tijaabinta nidaamka digniinta

Isniinta ugu horreysa ee aan maalin fasax ah ahayn ee bilaha Maarsø, Juunyo, Sibtember iyo Diisember, ayaa la tijaabiyyaa digniinta gudaha iyo dibadda. Uma baahnid inaad wax sameysid aan kaliya aheyn inaad kaliya u fiirsato inay digniintu shaqeynayso. Cod gubdiyaha digniinta dibada ayaa dhawaaqaaya/yeedhinaaya hoon saacadda 15.00. Waxa xilliga fiidka ee saacada 19.00 shidmaaya aaladda digniin qaabileha/soo qabtaha iyadoo uu raadiyow Iswiidhanna akhriyi doono fariin tijaabo ah oo aalada digniinta soo qabata laga maqlaayo.

## Ogeysiis muhiim ah oo dadweynaha ku socda (VMA)



Signal 7 ilbiriqsi - hakad 14 ilbidhiqsi

## Khatartii waa ay dhamaatay



Signal aan kala go' lahayn 30 ilbidhiqsi

# Sidan ayay kuu saameynayaan maaddooyinka kaahfalaha ah iyo shucaacu

---

Waxa bay'ada laga helaa xaddi yar oo maaddada kaahfalaha ah taas oo shucaaca ay soo deynaysaa ku saameyn karo. Waxa maalin walba ku soo gaadha shucaac dabiici ah oo hawada sare ka yimaada kaas oo ku jira ciidda, biyaha iyo jidhkeena. Marka baadhitaan caafimaad iyo daaweyn la sameynayo ayaa sidoo kale uu shucaac ku soo gaadhi karaa.

## Sidee ayuu shucaacu dhaawac kuugu keenaa?




Waxa uu shucaacu saameyn karaa unugyada jidhka si ay ama u dhaawacmaan ama ugu dhintaan. Unugyada ayaa dib loo hagaajin karaa, laakiin haddii shucaacu aad u xoog badan yahay, jidhku ka gaadhsiiin maayo inuu unugyada hagaajiyo. Markaas ayaa unugyo badani dhaawacmayaan taas oo keenta inaanay xubinta jidhka oo dhami shaqeynin. Waxa kuwaas loo yaqaanaa dhaawacyada degdegga ah. Waxa loo baahan yahay inuu shucaac badani muddo gaaban gudaheed yimaado si uu dhaawac degdeg ahi ugu yimaado.

Unugyada ayaa sidoo kale si qaldan loogu hagaajin karaa taasoo keeni karta dhaawacyo dib ka yimaadda sida kansarka. Fursada/Itimaalka ay taasi ku imanaayso ayaa yar maxaa yeelay jidhka waxa uu caadi ayaan leeyahay awood wanaagsan oo uu ku hagaajinaayo unugyada dhaawacan.

## Shucaaca shil warshadda tamarta nukliyeerka

Warshadda tamarta nukliyeerka ayaa lagu sameeyey nidaam looga hortagayo cilladaha farsamo iyo kuwa aadanaha ka yimaada labadaba. Haddii si kasata ha ahaatee uu dhaco shil keena inay maaddoojin kaahfale dibada u soo baxaan waxay dadku halis ugu jiraan inuu shucaacu soo gaadho. Doosaska shucaaca ee haddii uu shil dhaco imaan kara ayaa waxa uu ku xidhan yahay qiyaasta inta waxa soo baxay leegyihii iyo inta uu socdo oo ay weheliso cimilada jirta xilligaas iyo tallaabooyinka ilaalada ee laga gaadhsiiyo in la fuliyo.

Waxa uu shucaacu maaddoojin kaahfale kaaga iman karaan hawada ama dhulka. Waxa kale oo uu shucaacu ku soo gaadhi karaa iyadoo ay maaddoojin kaahfale jidhkaaga galaan. Waxay tani dhici kartaa adigoo ku neefsada, ay cuntada kuu raacdoo ama inay jidhkaaga gasho maaddoojin kaahfale oo taabtay jidhkaaga ama dharkaaga.



Wax dheeraad ah ka sii  
akhriso bogga internetka ee  
Strålsäkerhetsmyndighetens  
webbplats: **ssm.se**.

## Tusaale dooska shucaaca ka mid ah

Dooska shucaaca ee jadwalka ku dhigan ayaa lagu sheegaa halbeega millisiever (mSv).

### Tusaale dooska shucaaca ka mid ah

Isku celceliska dooska sanadka ee tusaale ahaan Iswiidhan	2.4mSv
Xadka dooska sanadkii ee dadka shucaaca ka shaqeeyaa waa	20 mSv
Dooska shucaaca ee haddii uu shil dhaco marka tallaabooyinka ilaalinta la wada qaado ayaa markasta ah	100 mSv
Dooska shucaaca ee waxyeelo keeni karaa waa	1000 mSv
Dooska shucaaca ee wax dili kara waa	10 000 mSv

# Sidan ayaad isku ilaalineysaa

---


Waxa jira siyaabo kala duwan oo maaddooyinka kaahfale la iskaga ilaaliyo. Habka ama hababka ugu haboon ayaa ku xidhan xaaladda warshadda tamarta nukliyeerka, cimilada iyo qaabka degaanka bulshada u dhisan tahay.

Maamulka gobolka ayaa go'aaminaaya oo kugu wargelinaya tal-laabooyinka ugu wanaagsan ee la qaadayo kolba xaaladda ay tahay. Sidaas darteed raac guubaabinta ay maamulka gobolku soo jeediyaan iyadoo ugu horrayn la soo marinaayo Raadiyowga Iswiidhan ee P4.

## **Haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco ayaa laga yaabaa inay kuu habboon tahay inaad:**



**Guriga gudihiiisa joogto.** Markaad guriga gudahiiisa ku jirtid ayaad dhimeysaa khatarta aad ku neefsaneyso walxaha shucaaca ee hawada ku jira. Dhismaha ayaa sidoo kale kaa difaaci kara maaddada shucaaca ee ka imanaysa hawada ama dhulka.



**Qaado kiniinnada Aayodhiinka.** Marka kiniinada Aayodhiinka ah la qaato waxa tayroodhka (qanjidh soo saara maaddo oo suga habka jidhku tamarta uga helo cuntada) ka buuxsameya Aayodhiin aan shucaac laheyn. Habkaas ayaa looga hortagayaa in qanjidhkaaga tayroodhka maaddo Aayodhiin oo kaahfale soo gasho.



**Meel kale u daadgureyn.** Marka meel laga tago ayaa laga taxadiri karaa ama la yareyn karaa khatarta inuu ku soo gaadho shucaaca dibada u soo baxay.



**Jidhka maydho oo dharka beddel.** Markaad qubey-sato, dharka beddesho ee aad si joogto ah gacmaha u dhaqdo waxaad dhimeysaa khatarta ay jidhkaaga ku galayso maaddada kaahfale oo jidhkaaga ama dharkaaga soo gaadhaday kadib marka maaddooyin kaahfale ay dibada u soo baxaan.



**Cuntooyinka qaar iska illaali.** Iyadoo la iska ilaalinaayo cunista iyo cabbitaanka cuntooyinka qaar oo laga yaabo inay maaddooyin kaahfale ee dibada u soo baxay ay saameeyeen ayaad dhimeysaa khatarta ay maaddooyin kaahfale lehi jidhkaaga ku galayaan.

## Guriga gudihiiisa joog

Dhismayaasha guryaha ayaa kaa difaacaaya maaddooyin kaahfale ee dibada u soo baxa kadib marka uu shil warshadda tamarta nukliyeerka ahi dhaco. Wuxaad dicaafa ugu weyn ka helaysaa meelaha ay darbiyada iyo saqafku ugu dhumuc balaadhan yihii. Hubi inaad albaabada, daaqadaha, meelaha hawadu ka baxdo iyo meelaha laydhinta/fantalayshanka xidho. Sidaasi ayaad ku yareynaysaa khatarta in maaddooyin kaahfale ee ay hawadu sidaa ay guriga soo galaan.

Waxay guubaabinta in guriga gudihiiisa la joogo ay sidoo kale khu-seysaa xawayaanka iyo xayawaanka la rabbaysto ee guriga lagu haysto. Haddii ay suurtogal tahay xidh albaabada iyo daaqadaha xerada xawayaanka iyo aqalka cawska/cuntada loo dhigaa leeyihiin. Adigoo daboolaaya cuntada iyo biyaha ayaad ka ilaalinaysaa inay iyaga ku dhex qasmaan maaddooyin kaahfale.

Haddii ay qasab noqoto inaad dibadda u baxdo, ayaa waxa wanaagsan in afka iyo sinka lagu xidho wax lagu illaaliyo iyadoo sidoo kalena jidhka lagu qariyo maro dabooleysa. Waxa taas kuu sahlaaya had-dii ay fududey in si dhibyar dharka loogu nadiifin karo sida dharka roobka ee sida sahlan biyo loogu raacin karo. Iska ilaali inaad guriga dharka banaanka la soo gasho si aad ugu yarayso khatarta faafinta maaddooyinka kaahfale. Jidhka maydho markaad soo gasho.

Sii wad inaad dhageysato Raadiiyowga Iswiidhan ee P4 Halland si aad ugu hesho macluumaadka xilligaa jira. Maamulka gobolka ayaa ku wargalin doona marka ay khatartu dhammaato ama haddii ay tahay inaad talaabo kale qaado si aad naftaa ugu ilaaliso.




## Qaado kiniinka Aayodhiinka kaliya marka maamulka gobalku kugu booriyo uun

Shilka tamarta nukliyeerku waxa uu keeni karaa inay maaddo kaahfale oo Aayodhiin ah faafto. Qaadashada kiniinka Aayodhiinku waxay qanjidhkaaga tayroodhka ka dhergisaa Aayodhiin aan maado kaahfale laheyn, taas oo tayroodhka ka ilaalisaa inuu qaato Aayodhiin ay ku

jirto maado kaahfale. Carruurta iyo haweenka uurka leh ayuu kiniinka Aayodhiinku aad ugu muhiim yahay maadaama oo uu qanjidhka tayroodhka ee carruurta iyo uurjiifka uu yahay mid aad uga nugul ka dadka waaweyn. Wuxa ay cilmibaadhis muujinaysaa in qofka 40 sanno jir ka weyn aanu laheyn khatar ka sii weyn oo uu ugu dhacayo kansarka tayroodhka ee ay keento Aayodhiinka ay ku jirto maadada kaahfale. Wuxa sidaas darteed kiniinka Aayodhiinku ku jirtaa aanu waxba u tareynin dadka iyadu 40 sanno jir ka weyn. Waa inaan xawaayaanka la siinin kiniinka ay Aayodhiinku ku jirto.

Waa muhiim inaad kiniinka ay AayodhiinAayodhiintu ku jirto wakhtiga ku haboon aad qaadatid iyo kaliya marka uu maamulka gobolka taasi kugu booriyo uun. Haddii aad kiniinka ay AayodhiinAayodhiintu ku jirto qaadato xilli hore ama aad la daahdo qaadasdhada ayay saamayntu dhinmeysaa. Wuxa kiniinada AayodhiinAayodhiinka wadajir lala isticmaali karaa waxyaabaha kale ee kaa ilaalinaaya sida joogitaanka gudaha guryahan ama in meelkale loo baxsado. Da'daada ayaa dooska la qaadanaayo go'aaminaysa. Akhri wuxa ku qoran baakadda iyo warqada daawada la socota si aad dooska saxda ah ugu hesho.

Kiniinada Aayodhiinku waa dawo leh taariikh ay dhaceysa. Maamulka gobolka ayaa qaar cusub soo diraaya marka loo baahdo in kiniinka Aayodhiinka dib loo cusboonaysiyo. Haddii uu kiniinkaagii Aayodhiinku kaa lumay ama aad wax dheeraad ah u baahan tahay waxaad la soo xidhiidhaysaa maamulka gobolka.



Kaliya qaado kiniinka marka uu maamulka gobolku taas kugu booriyo uun. Waxay si gaar ah muhiim ugu tahay inay carruurta iyo dumarka kiniinka Aayodhiinka qaataan. Dooska ayaa da'da ku saleysan. Sidaas darteed si taxadir leh u akhri wuxa ku qoran baakadda iyo warqada daawada la socota (xaashida macluumaadka) ee baakadda ku jirta.

## Meel kale u daadgureyn

Haddii uu maamulka gobolku u arko inaanay joogitaanka gudaha gurigu difaac wanaagsan bixineynin waxaad u baahan kartaa in meel kale laguu daadgureeyo. Dadka degan ama kuwa ka shaqeeya aagga diyaargarowga ayaa u baahan kara in meel kale loo daadgureeyo ujeeddo ka hortag ahaaneed dartood. Xitaa qofka ku nool ama qofka ka shaqeeya aagga diyaargarowga ayaa u baahan inay isku diyaariyaan in meel kale loo daadgureyn karo.

In gurigaaga laga tago waxay noqon kartaa xaalad adag iyadoo aynu u baahan karno inaynu is caawino. Wuxuu tamarta bulshadu awooddha ugu horreyn loo baahan yahay in la saaro dadka aan is debberi karayn.

Waxa sidaas darteed qorsheynta daadgureynta ku jira diyaargarow tal-laabooyin kala duwan si aag loogu faaruqiyo:

- **Goobta la iskugu soo ururaayo** Goobta la iskugu soo ururayo Haddii maamulka gobolku kugu guubaabiyoo inaad aagga ka baxdo oo aanad haysan gaadiid aad leedahay waxaad tegi doontaa goobta la iskugu soo ururayo. Halkaas ayaa lagaa caawinayaan si aad uga sii socdaasho. Waxay goobta la iskugu soo ururaayo noqon kartaa maxadaddaha/bosteejada basaska ee immika la isticmaalo ama goobo ay ka mid yihiin dugsiyada iyo guryaha daryeelka halkaas oo uu basasku kaa soo qaadi karaan. Waxa maamulka gobolku isagoo soo maraaya Raadiyowga Iswiidhan ee P4 kugu wargalinayaan meesha la iskugu imanayo. Caawimada la siinaayo dadka aan iyagu awoodin inay iyagu goobta la iskugu soo ururaayo yimaadaan.

- **Goobta la isku daadgureynaayo** Goobta la isku daadgureynaayo Haddii aanad haysan meel aad tagto marka ay daadgureyni jirto (tusaale, aqalka xilliga xagaaga, dad qaraabo ama saaxiibo ah oo meel kale degan), ayaad goobta daadgureynta tegi kartaa. Halkaasayaad taageero ku salaysan baahidaada heli kartaa. Goobta qaabi-laada waxa ka jirta fursad lagu qubeysanayo, dharka lagu bedelanayo oo sidoo kale cunto iyo cabitaan fudud lagu helaayo.
- **Goobta qaabilaada:** Qofka aan haysan fursadda uu ku diyaars-anayo meel uu dego ayaa goobta qaabilaada loo furi doonaa.

Xaaladda ayaa go'aamin doonta goobaha loo cayimaayo iyo goobta daadgureynta ee la furi doono. Dhageyso Raadiyow Iswiidhan P4 Halland si aad ugu hesho maclummaadka wakhtigaas taagan.

Qeybo ka mid ah shaqaalaha warshadda tamarta nukliyeerka ayaa guriga loo dirayaahaddii uu shil dhaco. Waxa sii joogi doona shaqaalaha lagama maarmaanka ah ee loogu baahan yahay si ay ugu maa-reeyaan shilka ka dhacay warshadda tamarta nukliyeerka.

Haddii lagugu booriyo in meel kale laguu daadgureeyo waxa muhiim ah inaad waxyaabaha daruuriga ah uun soo qaadato. Waxa goobta dadka lagu soo daadgureeyo ilaalinaya booliska.



Maclummaad dheraad ah oo ku  
saabsan tallaabooyinka dadka lagu  
ilaalinaayo ka akhriso  
[www.lansstyrelsen.se/halland](http://www.lansstyrelsen.se/halland).

## Aagagga diyaargarowga ee ku xeeran Warshadda tamarta nukliyeerka ee Ringhals



- Aagga diyaargarowga ee gudaha qiyaastii 5 km
- Aagga diyaargarowga ee dibadda qiyaastii 25 km

## **Waxyaabahan ka fikir haddii ay qasab kugu noqoto in meel kala laguu daadgureeyo**

Ka fikir inaad kaliya soo qaadato uun waxyaabaha daruuriga ah had-dii aad u baahato in meel kale laguu daadgureeyo. Waxyaabaha ay wanaagsan tahay in laga fikiro ama la soo qaato marka la is daadgu-reynaayo waa:

- kiniinka Aayodhiinka iyo dawooyinka
- waxyaabaha nadaafadda loo isticmaalo
- liisanka, kaadhka aqoonsiga, baasaboorka iyo waxyaabaha aqoon-siga ee kale
- dhar dhaxanta kaa celiya iyo wax aad ku bedelato
- lacag/kaash, kaadhka bangiga, aalada lagu galo bangiga internetka
- telefoonka gacanta/moobaylka iyo xadhiga lagu jaajgareeyo
- xayawaanka la rabeysto

wanaagsan inaad caawiso qof aan isagu kaligii goobta daadgureynta tagi karin. Dadka helkaaga ah u sheeg meesha aad tageyso. Iska ilaali inaanad telefoonka wax badan isticmaalin ku hadalka si aad u dhinto culayska saaran khadka moobaylka, waxaad taas bedelkeeda diri kartaa sms/fariin qoraal ah.

## **Cuntooyinka qaarkood iska jooji**

Hay'addaha dawlada ayaa laga yaabaa inay kugula taliyaan in aanad cunin ama aanad cabin cuntooyinka qaar. Ujeeddada taas laga lee-yahay ayaa ah in laga fogaado inay jidhkaaga maaddooyin kaahfale galaan markaad wax cunayso ama cabeyso. Biyaha la cabbo iyo caanaha ayaa ka mid ah cuntooyinka uu shil nukliyeerka oo dhacay waxyar ka dib saameyn karo. Waxay hay'adaha dawlodu sidoo kale soo jeedin karaan inaad ka fogaaato cunista cuntada aad adigu guriga ku beerato.

## Sidan ayaynu isku diyaarinaa

---

Waxa ujeeddada laga leeyahay qorshaynta diyaargarowga ee hay'adaha dawlada ee shilka nukliyeerku yahay in laga fogaado dhaawacyada degdega ah, oo la xaddido dhaawacyada dib ka yimaada ilaa iyo inta suurtagal iyo macquul ka ah. Waxa hay'adaha dawladda masuulyad ka saaran tahay inay hubiyaan inay jiraan qorsheyaal dadweynaha lagu ilaalinayo. Shakhsii ahaan masuulyiyad ayaa ku saaran. Diyaar garow adigoo soo qaadanaya waxyaabaha loo baahan yahay oo diyaar-garowgaaga ka fikiraaya. Waxa wanaagsan inaad is weydiiso:

- Miyaan garanayaan waxaan sameeyo haddii aan signal digniin ah maqlo?
- Miyaa aniga iyo qoyskaygu garaneynaa waxaanu u baahanahay si aanu dhowr maalmood gudaha guriga ugu jirno?
- Miyey jirtaa meel aan aadi karo haddii ay qasab noqoto in meel kale la isku daadgureeyo?
- Xaggee ayaan kiniinkeygii Aayodhiinka ahaa dhigtay?
- Sidee ayaan sameeyaa haddii aan macluumaa dheeraad ah u baahanahay?

### Waxan ayay hay'adaha dawladdu qabanayaan

Maamulka gobolka ayaa ka mas'uul ah hawlahaa samatobbixinta iyo in dadweynaha laga ilaaliyo shucaaca haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco. Maamulka gobolka ayaa isaguna talo iyo taageero ka heli doona dawlada dhexe sida Hay'ada Gurmadka Rayidka, Hay'adda amniga shucaaca, Hay'adda beeraha iyo Hay'adda badbaadada cuntada. Adeega

gurmadka deg-degga ee degaanka, Booliska, ilaalada xeebaha,  
Hay'ada gaadiidka iyo Region Halland län ayaa sidoo kale ka wada  
shaqeynaaya diyaargarowga.

### **Waxay warshadda tamarta nukliyeerka leedahay diyaargarow**

Haddii uu shil yimaado waxa dhici kara in waxa/sunta soo baxday hawada iyo biyaha gasho. Waxay warshaddaha tamarta nukliyeerka ee Iswiidhan leeyihiiin farsamo iyo qorsheyn lagaga hortagaayo ama lagu xakameynaayo sunta maaddooyin kaahfale.

### **Diyaargarowgaaga guriga**

Haddii aad is diyaariso waxa dhibyar inaad xaalad adag/masiiboon ka baxdo. Waxay tani khuseysaa dhamaan noocyada kala duwan ee xaalandaha adag: korontada oo tagta, biyo kulul/kulka oo la waayo, biyo go'a ama shil nukliyeer oo dhaca.

Diyaargarowgu siyaabo ka duwan ayuu u eg yahay, tusaale ahaan haddii aad joogto miyiga/baadiyaha ama magaalo, guri ama guryaha dabaqa ah. Sidaa darteed ayaa loogu baahan yahay in diyaargarowga guriga xaaladdaada lagu saleeyo. Waxyaabaha qaar ayaad dadka isku darsan kartaan, kuwa kalena kala qaadan/ahaaman kartaan.

### **Isku diyaargaree inaad guriga gudahiisa joogtid**

Haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco waxaad u baahan kartaa inaad guriga gudahiisa dhowr maalmood ku jirtid si aad naftaada ugu ilaaliso. Markaad qorshahaaga diyaargarowga guriga sameynayso waxa ugu muhiimsan waa cunto, biyo, kulka iyo fursad aad warka iyo macluumaadka muhiimka ah ku helayso.



**Biyo nadiif ah oo la cabbo.** Biyaha shirikaan/caagad ku key-dso haddii ay dhacdo in biyaha qasabada la isticmaali kari waayo. Ku talagal inaad ugu yaraan saddex litir qofkii weynba maalintii u xisaabiso. Biyaha ku keydi meel madow oo qabow.



**Cunto.** Waa inaad guriga ku haysato cunto mudo dheer jiri karta/aan xumaanin. Waxa wanaagsan inaad doorato cunto si degdeg ah loo diyaarin karo oo biyo yar u baahan ama aan biyaba u baahneyn. Waxay tusaale taas ka mid ahi yahay: baastada, cadaska, digirta, digirta, khudradda xididka leh, lawska, kafeega, jiiska jilicdasan, rootiga qalalan, buskudka qalalan ama rooti kale oo aan muddo dheer xumaanin.



**Kulka.** Haddii korontadu kaa tagto ayuu gurigu degdeg ugu qaboobi karaa. Sidaas daraadeed ayay wanaagsan tahay in dharka dhaxanta celiya, gaasta wax lagu kululeeyo, isbiirtada madbakha lagu shito shidaal ahaan, nalalka shamaca, jawaan lagu seexdo, bustayaal iyo kabriid la haysto. Ka fikir khatarta dabka!



**Warka la soco.** Raadiyowga leh dhagaxaan/baytari ama cadeedda/qoraxda ku shaqeeya ayaa fiican in la haysto. Haddii ay dhacdo khatar ahi timaado waxaad u baahan kartaa inaad hesho macluumaadka soo maraaya Raadiyaha P4 Halland. Waxa telefoonkaaga lagu buuxin karaa baatari dheeraad ah ama jaarjarka/dabeeiyaha gaadhiga lagu isticmaalo. Waxa wanaagsan inaad telefoonada muhiimka ah warqad ku qoratid.

VIKTIG INFORMATION TILL SVERGES INVÄNARE



Wax dheeraad ah ka sii akhri buug-yarahaa "Om krisen eller kriget kommer" kaas oo boostadu guriga kuugu soo tuurtay. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diyaargarowga guriga ka heli kartaa [msb.se](http://msb.se).

# Halkan ayaad maclumaad dheeraad ah ka helaysaa

Maclumaadka ka raadso ilaha saxda ah. Hay'addaha dawlada ayaa isticmaala Raadiyowga Iswiidhan ee P4 si ay maclumaadka u faafiyaa. Ha rumaysan kutidhi kuteenta, si gaar ah uga firso waxyaabaha baraha bulshada lagu faafiyio. Istimaal ilo dhowr ah oo lagu kalsoomaan karo si aad ugu eegto inuu maclumaadku sax yahay.

**Maamulka Gobolka:** Haddii aad su'aalo ku saabsan kiniinka Aayodhinka ah qabto ama aad rabto inaad wax dheeraad ah ka ogaato u diyaargarowga tamarta nukliyeerka. **E-mailka:** [halland@lansstyrelsen.se](mailto:halland@lansstyrelsen.se), **Telefoonka:** 010-224 30 00

**Strålsäkerhetsmyndigheten:** Ka shaqeeya si dadka iyo degaanka loogu ilaaliyo inay soo gaadho saameyn aan loo baahnayn oo uu shucaacu keeno. Maclumaad dheeraad ah ka akhri **ssm.se**.

**Hay'adda Gargaarka Madaniga ah (Myndigheten för samhällsskydd och beredskap ama MSB):** Guudka kala socda oo taageero siinaaya hay'addaha dawlada ee ka mas'uulka ah u diyaargarowga tamarta nukliyeerka. Maclumaad dheeraad ka akhri nidaamka digniinta dibadda **msb.se/vma**.

## Maclumaad ku saabsan masiibooyinka

- **Raadiyowga Iswiidhan ee P4 Halland** ayaa ah kanaalka diyaargarowga ee wax tabinaaya haddii ay shilal khatar ah iyo masiibo dhacdo.
- Bogga internetka ee **krisinformation.se** waxa aad ka heli kartaa warbixin joogto ah oo dhammaystiran oo ka socota hayaddaha Iswiidhan marka ay masiibooyin jiraan.
- Wac lambarka masiibooyinka **qaranka ee 113 13** si aad ugu hesho maclumaad ama aad ugu dhiibto maclumaad haddii uu shil nukliyeer ahi dhaco ama xaalad kale oo masiibo xun ahi dhacdo.
- Wixii talobixin caafimaad iyo daryeelka bukaanka, booqo bogga internetka **1177.se**.



# Liiska waxyaabaha la hubinayo

## Dadka degan aagga diyaargarowga ee ku dhow warshadda tamarta nukliyeerka:

- Waxaan aqaaana signalka/calaamadaha digniinta anigoo og waxaan sameynaayo.
- Waxaan rakibay digniin-qaabile/soo qabte anigoo garanaaya in afar jeer sanadkii la tijaabiyo.
- Waxaan garanayaa meesha ay yaalaan kiniiniyada Aayodhiin ee la isku qeybiyey.

## Haddii uu shil dhaco:

- Waxaan garanayaa meesha aan tegi karo haddii la go'aamiyo in meesha dadka laga daadgureeyo.
- Waxaan ogahay inaan had iyo jeer dhageysto Raadiyowga Iswiidhan ee P4 si aan macluumaad dheeraad ah ugu helo haddii shil dhaco.
- Haddii la isku booriyo in gudaha guriga la joogo, ayaan xitaa gudaha soo galinayaa xayawaanka dibadda jooga.
- Waxaan xidhayaa albaabada iyo daaqadaha, xitaa kuwa xerada xawaayaanka iyo aqalka cawska/cuntada loo dhigaa leeyahay.
- Waxaan la soconayaa macluumaadka saxda ah anigoo isticmaalaya kanaalada la yaqaan, taa oo uu ugu horeeyo Raadiyowga Iswiidhan ee P4.

## Marka meel kala la isku daadgureynaayo

### Soo qaado:

- kiniinka Aayodhiinka iyo dawooyinka
- waxyaabaha nadaafadda loo isticmaalo
- liisanka gaadhiga, kaadhka aqoonsiga ama baasaaboor
- dhar dhaxanta kaa celiya iyo wax aad ku bedelato
- lacag, kaadhka bangiga, aalada bangiga internetka lagu galo
- telefoonka gacanta/moobaylka iyo xad-higa lagu jaajgareeyo
- xayawaanka la rabeysto.

## Ka fikir:

- Inaad qaraabada u sheegto meesha aad tageyso.
- Dadka u dir sms/fariin qoraal ah, halkaad ka waci laheyd telefoonka si aad u dhinto culayska saaran khadka moobaylka,
- Caawi dadka aan iyagu kaligood goobta daadgureynta tagi karin.
- Guriga gudahiis kaga tag xayawaanka aan la kaxeysan karin (xoolaha beerta jooga iyo fardaha) iyadoo aad cunto iyo biyo muddo dhowr maalmood ah ay isticmaalaan uga tageyso.
- Macluumaadka xawayanka meesha ku hadhsan sii booliska.
- Carruurta dugsiga xanaanada iyo kuwa dugsiga dhigta iyo sidoo kale dadka ku jira guryaha daryeekla aayaad daadgureynta lagu caawinayaa.

## Isku diyaargaree inaad guriga gudahiisa joogi kartid adigoo:

- Biyo nadif ah ku keydsanaaya shirikaano ama tusaale ahaan caagadaha biyaha ee PET-ga oo talaagada/qaboojiyaha la galiyo.
- Waa inaad lahaato istoodh aad ku keydsato cunto wakhti dheer jirta/aan xumaanin.
- Hubi inaad kulka keydsan karto oo aad cunto karsan karto iyadoo aanay koronto jirin, diyaarso shumac, isbiirtada mad-bakha lagu shito shidaal ahaan, jawaan lagu seexdo.
- Waa inaad haysato raadiyow baytari leh, ama haddii kale Raadiyowga baatarigiisa gacanta lagu jaajgareeyo/buuxiyo si aad warka ula socotid.



Macuumaadka  
xidhiidhka ayaa  
bogga kale ku yaalla





# Waxaad macluumaaad dheeraad ah haddii uu shil yimaad ka helaysaa

---

Raadyowga Iswiidhan ee P4 Halland,  
**[www.sverigesradio.se/halland](http://www.sverigesradio.se/halland)**

Länsstyrelsen Hallands län, **010-224 30 00**  
**[www.lansstyrelsen.se/halland](http://www.lansstyrelsen.se/halland)**

Macluumaaad ku saabsan masiibooyinka ee  
hay'addaha dawlada oo lagu soo ururiyey,  
**[www.krisinformation.se](http://www.krisinformation.se)**

Lambarka macluumaaadka qaranka ee Iswiidhan  
marka ay shilalka waaweyn iyo masiibooyin dha-  
caan, **wac 113 13**